

Waxqabad loogu talagalay dadka awoodda jidhkoodu hoosayso si looga yareeyo dhibta cudurka safmarka

Safmarka koroonahu waxa uu dhib weyn gaadhsiiyay dadka awoodda jidhkoodu hoos u dhacday. Guddi-hawleed ay dejisay Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka ayaa soo jeediyay waxqabadyo ku saabsan caafimaadka iyo daryeelka oo lagu yarayn karo cawaaqibka cudurkan safmarka ah ku keenayo dadka awoodda jidheed hoos u dhacday iyo ehelkoodaba.

Guddi-hawleedku waxa uu hadda soo gudbiyay warbixin.

– Waan ku faraxsanahay in warbixintani ka kooban tahay waxqabadyo la taaban karo oo lagu yarayn karo cawaaqibka cudurkan safmarka ah ku keenayo dadka ay awoodda jidheed hoos u dhacday iyo ehelkooda. Si hadda loo balaadhiyo adeegyada, waxa aan Agaasinka Caafimaadka ka codsaday in ay cusboonaysiiyaan talooyinkooda cilmiyeed, in ay waraaqo u diraan dhammaan degmooyinka waddanka iyo gudoomiyeyaasha gobolled iyo in ay qabtaan webinaar ku saabsan ka hortagga cudurka iyo xuquuqda dadka awoodda jidheed hoos u dhacday, ayuu yidhi Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka iyo daryeelka.

Guddi-hawleedku waxa uu ka koobnaa Agaasinka Caafimaadka, Agaasinka Carruurta, Dhallinyarada iyo Qoyska (Bufdir), Agaasinka Waxbarashada, Midowga Dadka Awooddu Hoosayso, SAFO (golaha wadashaqaynta ururrada dadka awooddu hoosayso), Midowga dhallinyarada awooddu hoosayso, Mental helse, Midowga Ehelka ee Norway iyo Ururka Caafimaadka Dadweynaha.

Kelinimo dareemay

Xilligii lagu jiray safmarka koroonaha dad badan oo awoodda jidhkoodu hoosayso ayaa dareemay kelinimo, oo cidlooday islamarkaana sidii hore si la mid

ah aan u helin adeegyada degmada ee caafimaadka iyo daryeelka, adeegyada caafimaadka ee takhasuska ah, waxbarashada, firfircoonida wakhtiga firaaqaha ah iyo shaqo.

Buufdir warbixinteeda ku saabsan u kuurgalkii (2020) lagu sameeyay cawaaqibka ku yimi sinnaanta ee dadka awooddoodu hoosayso ka soo gaadhay safmarka koroonaha ayaa tilmaamay natiijada dhow iyo ta fog ee ka dhalanaysa kelinimo muddo dheer lagu jiro iyo in la-xidhiidhka dadku yaraado, iyo culays dheeraad ah oo ku imanaya ehelka. Xataa muddooyinka bulshada dib loo furo, waxa Buufdir sheegtay in isbeddelku guud ahaan si gaabis ah u socdo oo xataa mararka qaarkood uu dadka awoodda jidheed hoosayso dhankooda sii gaabinayo.

Caafimaadka oo sii xumaaday

Guddida Kormeerka Caafimaadka ayaa soo sheegtay in dadka u baahan adeegyo isku dhafani ay badankoodu sheegeen in ay wakhtigii koroonaha heleen adeegyo ka yar intii hore, iyo in caafimaadkoodu sii xumaaday. Waxa kale oo la soo sheegay in ehelka dadkani yihiin kuwa inta ugu badan kordhiyay caawintii ay siin jireen.

Arrintaas darteed waxa Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelku ay markaa Agaasinka Caafimaadka ka codsatay:

1. in ay qiimayso in waxqabadyada guud ee loogu talagalay dadka jilicsan laga sii dhigi karo kuwo ku habboon dadkaas, ama in waxqabadyo cusub loo abuuri karo dadka awoodda jidheed hoosayso.
2. in ay qiimayso soo-jeedinnada khuseeya hawlaha Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka ee ku jira warbixintii Buufdir iyo in ay habboon tahay in la fuliyo iyo in kale, iyo waxyaalaha loo baahan yahay si loo fulin karo, sida cawaaqibka dhaqaale ama maamuleed ee ka imanaya.